ANNAGAA KU DILNAY



CABDIRAXMAAN MAXAMED XUSEN

DAMBIILAYAAL?

"Dhamaanteena waxaynu nahay dambiileyaal laga yaabee in aanan ogeen qofkaa dambiga ka Galnay ama sidaan u galnay balse waxaa hubaal ah In aan dambiileyaal wada nahay"

BY: CABDIRAXMAN MAXAMED XUSEN

SHEEKO KU SALAYSAN DHACDO DHAB AH.

BILOWGA SHEEKADA

Caruurnimadiisa ma aheyn mid xasuus mudan oo qurux badan waxay aheyd mid laga baxsado oo mugdi badan waxa Uu ku koray xanaanada caruurta goob magac ahaan wadata Daryeel iyo naxriis balse waxa gudaha ka dhacaayo kaliya Ogyihiin kuwa ku dhex nool isagana mar walab waxaa lagu cunsuriyeen jiray sababtoo ah sharci daro aa lagu dhalay waa " **WECEL** " marki ay carruurtu qosli Jireen isaga wuu fiirin jiray markii la ammaano wuu aamusi Jiray Aamusnaantaas ayaa noqotay saaxiibkiisii ugu Daacadsanaa. Iyo kan ugu dhow aamusnaantaas ayuu ka Dhex raadin jiray jawaabaha su aalihiisa Wuxuu bartay inuu Dhagaysto halkii uu ka hadli lahaa,inuu fahmo halkii uu ka Caban lahaa murugada ma muujin jirin wuxuu ku keydsan jiray meel aan indho gaari karin. carruurnimadiisu ma Dhisin cod ee waxay dhistay aamusnaan, aamusnaan qof ka Dhigta mid ku nool gudaha naftiisa

Waxa uu si degdeg ah u gartay in dunidu aysan u sinnayn Carruurta oo dhan. qaar waxaa la siiyey gacmo diirran iyo Erayo macaan iyo daryeel waalid isagana waxaa la siiyey jadwal, amarro, iyo Indho aan waligood arag waxa qalbigiisa ka socda.

Xanaanadaasi ma barin jacayl,waxay bartey samir qadhaadh Ma barin riyo ee waxay bartey sida riyada loo aamusiiyo

Marka uu waynaaday waxaa loo diray guri bulsho ah iyo Beer. goob shaqada ay tahay nolol nasashadana ay tahay Riyo subax walba wuxuu toosi jiray xili hore wuxuuna is waydiin jiray "**maanta imisa jeer aa wecel lagu dhihi doonaa**"

Markuu imaado beerta gacmihiisa way shaqeyn jireen balse maskaxdiisa meel kale ayay jirtay Inta lagu guda jiro shaqada beerta cidna lama uusan hadli jirin balse waxa uu Dareensanaa in ay dadka oo dhan ay asaga ka wada Hadlayaan. mar walba lagu aflagaadeeyo " wecel "

Wuxuu naceyb xun u qaadi jiray dadka ku dhaha Hadaladaas sida sunta ah uu asaga dhibsanaayo xitaa waalidiintiisa sababtoo ah waa kuwii ku qasbay in uu maro ciqaabta khalad uusan asaga geysan Heer wuxuu gaaray Qof walba markuu hadli rabo intuusan hadlin ka hor Maskaxdiisa ay sii qiyaasto waxaa maskaxdiisa uu ka

Dhex maqlaaye codad soo noq noqda Wuxuu ka fogaaday Dadka si uusan u maqal af lagaadadooda sababtoo ah uma Dulqaadan karo maalintiina saas uu shaqadiisa ku gudan Jiray isagoo aanan cidna la hadal maalintaas oo dhan .

Markuu guriga ku soo laabto wuxuu si degdag ah u tagi
Jiray qolkiisa isagoo aanan cidna lama hadlin
Qolka uu seexanaayo sariir duug ah darbi aamusan. Daaqad aanan ifitiin keenin maskax ka socdaan dagaal fikir qoto dheer iyo shaki maskaxdiisa waxay aheyd sida maxkamad dood ka socota mar way difaaceyse marna way ka soo hor jeedsaneyse balse mar walba natiijada waxay aheyd : **qirasho uu naftiisa u jeediyay.**
Maalin ayuu ku jiifsaday sariirtii uu ku dul fikiri Jiray balse markaan wuu awoodi kari waayay in uu dib u kaco malaha Waxaa la gaaray meeshi Ugu dambeese uu u dulqaadan Lahaa hadalada Xun ee dadka kale iyo niyad jabka iyo Ceebta ay Dadka kale dusha ka saareen balse asaga uu Aqbalay ilaa mudo dheer wuxuu dhex jiifay qolkaas Gudcurka daran ka jiray iyo afartaas darbi aamusan ma Jirin cid waydiineysa xaaladiisa qolkiisa Wuxuu naqday Mid ka jira ur daran ma jirin qof U imaada si uu qolka ugu Nadiifiyo asna ma Awoodo. Balse mudo dheer kadib waxaa U timid Gabar kamid ah gabdhaha ku noolaayeen Gurigaas Bulshada badan si ay ugu nadiifiso qolka iyo Asaga qolka ay u nadiifisay asagana dharka ayay ka Badashay gabadhaas ma aysan aheyn mid hadal badan Balse imaatinkaas yar iyo joogitaankaas yar waxay aheyd neef uu mararka qaar ku nasto

Maalin ayuu sariirta ku jiifsaday sariirtii uu mar walba ku fikirayay mana uu kicin ma ahayn dhimasho degdeg ah mana ahayn mid qaylo leh waxay aheyd dhimasho ka timid maskax, jir, iyo qalbi daallan, oo muddo dheer la dhaawacayay, la jilcinayay, loona oggolaanayay in si tartiib ah loo baabi'iyo. oo loo dilo

Caruurnimadiisa ma aheyn mid fiican waxa uu ku soo koray goobaha caruurta lagu xanaaneeyo wuxuu ku soo dhex koray magaalo caruurta la daneeyo loona jeedin jiray Naxriis balse asaga muusan helin waxaas oo dhan

Habeen walba wuxuu la seexan jiray xusuus aan nasan, subax walbana wuxuu toosi jiray isagoo ka sii daallan sidii shalay dunida oo dhan oo aan isha ku haynin dhaawaciisa, maskaxdiisa oo sii jabaysa, qalbigiisa oo sii madoobaanaya

Ugu dambeyn wuu dhintay ugu dambeyn wuu ka nasan Doonaa hadaladii xumaa iyo sida qaabka daran aa ula dhaqannay

Dadku waxay yiraahdeen "**Stress ayuu u dhintay**"

Laakiin cidina ma aysan odhan: "**Waxaan ku dilnay hadalkeenna**"

GUNAANUD

Buugaan yar waxaan u qoray si aan bulashada ugu buraarujiyo hadalada sida fudud ay ku dhahaan in ay qof noloshiisa wax gaarsiin karto bulshada waa inay barato in hadal kastaa uu leeyahay miisaankiisa eraygu ma aha wax fudud. Waa hub aan la arki karin, wuxuu burburin karaa, wuu dhaawici karaa, wuu sababi karaa in qof uu aamuso, in qof uu dhinto kaligiis, iyadoo aan qofna dareemin.

Dunida oo dhan waxay leedahay indho, balse indhaha qaar ayaa iska indhatira markay arkaan dhaawaca dadka kale. Waa masuuliyaddeena inaan aragno, inaan ka hadalno, inaan caawino ma aha inaan aamino in hadalku yahay wax yar qof walba oo nool waxaa mas uuliyad ka saaran hadaladiisa hadalkaaga ama erey aa qof ku dhahday haduu qofkaas dhaawaco waxaa tahay dambiile

Rasuulkeena maxamed scw aa na leh

«مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصْمُتْ»

"Qofkii rumaysan Ilaahay iyo Maalinta Qiyaamaha haku hadlo wax wanaagsan, ama ha iska aamuso."

DHAMAAD

Qora: Cabdiraxman maxamed xusen

ANNAGAA KU DILNAY



CABDIRAXMAAN MAXAMED XUSEN